UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs (OCHA) – SOMALIA

Warbixinta Xaaladda # 37 – 19 September, 2008

Is-beddellada guud ee ugu muhiimsan

Maraakiibta Ciidanka Badda dalka Canada ee galbinayey Maraakiibta raashinka gargaarka u siday ha'y'adda Barnamijka Cuntada Adduunka (WFP), ayaa hawlgalkoodu wuxuu ku ekaa 27 September 2008. Ma jiro ilaa hadda waddan kale oo ku yaboohay inuu xilka la wareegayo xilligan oo ah midka ugu adag marka la eego , dadweynaha Soomaaliyeed ee u baahan yihiin gargaar dheeraad ah oo noloshooda lagu badbaadinayo, iyo waqtigan oo ay sare u sii kacayaan fafalka budhcad badeedka ee xeebaha Soomaaliya (waxayna wadarta af-duubka maraakiibtu gaadhaysay bishii August oo keliya ilaa toddobo afduub, iyadoo in ka badan ilaa 50 weerar ay dheceen intii sannadkan gudihiisa). Ilaa 90% raashinka WFP ee Soomaaliya u socda ayaa waxaa ay maraan dhinaca badda. Maalintii isniinta ahayd ee 15kii September, wuxuu Midowga Yurub heshiis ku gaadhay dhismaha waaxda isku-xidhka hawlgallada ee Brussels, si ay u taageerto hawlgallada Reer Yurub ee ku wejahan hawlgallada dhinaca taxadarka xeebaha Soomaaliya.

Bilihii August iyo September, waxaa sii kordhyey tirada dadka qaxootiga magan-gelyo doonka ah ee soo galaya xeebaha dalka Yemen (oo ay Soomaalidu ugu badnaayeen). Waxayna bilaabatay mawjadda baaxadda leh ee dadka tahriibka xilliiga ugu ba'an ka dib markii kacsaanantii mawjadaha ee Gacanka Cad-meed ay imminka hoos u soo dhaceen. 11kii September, ugu yaraan 29 tahriib ah ayaa ku qaraq-may kaddib markii dadka sharci-darada uga shaqaysta tahriibta ay ku khasbeen inay ka boodaan dooni buuxday oo badda isku tuuraan. Mar labaad,15kii September, ayaa in ka badan 50 qof laga cabsi qabaa inay ku qaraq-meen, kaddib markii dhacdo taas la mid ah ay la soo gudboonatay tahriibayaashii. Sida laga soo xigtay hay'adda UNHCR, in ka badan 28,000 qof oo ka mid yihiin ilaa 19,071 Soomaali ah, ayaa lagu qiyaasay inay doonyo halis ah ugu goosheen badda dhinaca dalka Yemen intii lagu guda jiray sannadkan. Sidoo kale isla sannadkii tegey waxaa badda ka tallaabay ilaa 16,000 qof; tirada dadka sannadkan 2008-da u sii gudbay dhinaca Gacanka cadmeed ayaa laban-laabantay.

Marka laga soo bilaabo 2008 15kii September, ilaa 45,911 qoxooti ah ayaa la diiwaangeliyey xerada Qoxootiga Dadaab Refugee Camp ee Kenya oo ay ku jiraan 43,879 oo 96% ay ka yimaadeen dalka Somalia. Waxaa kaloo jira ilaa 6,000 qof oo weli sigaya in la diiwaangeliyo, kuwaasoo halkaas soo gaadhay in ka badan 2-3dii toddobaad ee ugu dambeeyey.

Xaaladda nabadgelyada ee ka sii daraysa ee ka jirta Bartamaha/Koofurta, ayaa waxay caqabad ku noqotay hawlaha gargaarka dhinaca bini'aadminnimada. Labo ka mid ah shaqaalaha WFP, ayaa lagu af-duubay 14kii September Tuulada Qalimo oo ku taalla (30km Koofurta Jowhar, gobolka Shabeelaha Dhexe), kuwaasoo goor dambe oo isla maalintaas ahayd la sii daayey. Mana cadda sababta ka dambaysay af-duubkaas. 13kii September, dabley aan la garanayn, ayaa iyaguna weerar u gaystay oo dhacay gaari siday raashin gargaar ah oo ku wejahan barnaamijka noocyada cuntada bisil/karsan ee Mogadishu, ayna hirgaliyso hay'adda aan dawliga ahayn(NGO) ee SAACID. Dadaal ay arrintaas ka gaysteen hoggaamiyayaasha bulshada, ayaa ku guulaystay in noocyadii raashinka la dhacay dib loo soo celiyey. Si kastaba ha ahaatee, waxay dhacdadaasi sababtay in al-baabada loo xidho maalin keliya, sagaal ka mid ah lix iyo tobanka xarumaha Jikooyinka cunto-karinta ee Mogadishu. Ilaa 70,000 ilaa 80,000 qof, ayaa maalin kasta cuntada karsan loogu qaybiyaa Jikooyinkaaas.

Kooxda la-xiriirka Caalamiga ah (ICG) ee arrimaha Soomaaliya, ayaa markii ugu horraysay 16kii September kulan ku yeeshay Djibouti, iyadoo uu shir-guddoominayo Ergayga Gaarka ee Xoghayahay Guud ee QM ee Somalia, Ahmedou Ould-Abdallah. Kooxda ICG, ayaa waxay cambaaraysay rabshadaha sii kordhaya ee ka socda dalka Soomaaliya, kuwaasoo saamayn lixaad leh ku yeeshay dadka rayidka ah, labadaraadle, haweenka iyo carruurta. Waxay kaloo cambaareeyeen weerarrada ka dhanka ah shaqaalaha samafalka, iyagoo ugu baaqay dhinacyada dagaalamaya inay si deg-deg ah colaadda u joojiyaan, islamarkaana ay u oggolaadaan dhaqdhaqaaqa gargaarka bini'aadminnimada.

Sida ay sheegtay hay'adda Elman ee Nabadda iyo Xuquuqda Bini'aadmiga ee fadhigeedu yahay magaalada Mogadishu, ugu yaraan 9,500 qof oo rayid ah, ayaa lagu dilay Soomaaliya ilaa horraantii sannakii 2007. ilaa 838 qof oo Dadkaas ka mid ahaa, ayaa waxaa la dilay intii u dhaxaysay June iyo August ee sannadkan.

Gurmadka iyo Baahiyaha aan la daboolin

Toddobaadkan, waxay hay'adda WFP qaybisay noocyo cunto isku-dhafan oo gaarasay 741 mt, ayna ka faa'iidaysteen ilaa 7,100 haween ah oo ka qaybgalayey mashruuca faya-dhawrka, iyadoo loo sii marayey barnaamijka cuntada hawlgalka muruq-maalka ee (FFW) kaasoo laga hirgeliyey dhammaan 16ka Degmo ee magaalada Mogadishu. Barnaamijkan ayaa dib loo bilaabay labo toddobaadka ka hor, kaddib markii si ku- meel-gaar ah loo hakiyey, sababo la xiriiray qarixii 3dii August ee ay ku dhinteen ilaa 25 haween ah,ayna ku dhaawacmeen in ka badan 40 qof oo kale. Dhanka Barnaamijka cuntada bisil/karsan ee magaalada Mogadishu, waxay hay'adda WFP, u qaybisay toddobaadkii tegey, cunto gaaraysay ilaa 248 mt oo ay ka faa'iidaysteen ilaa 349,735 qof. Waxay kaloo WFP cuntooyin isku-dhafan oo gaarayey ilaa 1,080 mt u qaybisay ilaa 68,530 qof oo ku nool gobollo kala duwan oo dalka ka mid ah.

Hay'adda UNICEF, aya shaaca ka qaaday in carruur gaaraysa 142,654 oo da'doodu dhexeyso sagaal bilood ilaa 15 sano, laga tallaalay cudurka jadeecada ololihii ugu dambeeyey ee laga sameeyey Mogadishu deegaannada dadka bara-kacay mudaddaii u dhaxaysay 27 August iyo 4tii September 2008. waxaana ololahaas meel-marisay hay'adda Nabadda iyo Horumarinta Jumbo oo ah hay'ad maxalli ah oo aan dawli ahayn(NGO), iyadoo la kaashanaysa bulshada deegaanka, islamarkaana bartilmaameedkeedu ahaa 95% wadarta guud ee carruurta da'doodu ka yar tahay. Jadeecadu, waa cudur ka mid ah cudurrada dhibaatada weyn ku haya caafimaadka dadweynaha Soomaaliyeed, ahna sababta ugu weyn ee horseedda dhimashada marxaladda dhallaannimada. Waxayna Soomaaliya ka mid tahay goobaha ugu sarreeya xaddiga dhimashada dhallaanka iyo carruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano dunida guudkeeda, waxaana dhinta qiyaas ahaan 86 marka loo eego 1000kii carruur ah iyadoo lagu qiyaaso inay dhintaan 135 marka loo eego 1000 dhallaanka nolol ku dhasha. Tallaalka joogtada ah ee ololaha ka dhanka ah Jadeecada, ayaa ah ilaa 19% oo keliya dalka oo dhan.

Hay'adda Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah (ICRC) oo kaashanaysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliya (SRCS), ayaa waxay maacuun(NFIs) loogu talo galay ilaa 60,000 dadka ku bara-kacay(IDPs) ee 10 ka mid ah 16-ka degmo ee Mogadishu. Waxayna maacuuntaasi(NFIs) ka kobnaynd, hal bacda dhismaha, hal Jiko oo dhammaystiran, labo Busle, hal Jerry- can, labo shay oo dharka dadka waaweyn, labo shay oo ah labiska carruurta iyo hal derinta la goglado ama lagu seexdo. Hase yeeshee, degmooyin hadhay, ayaa weli u baahan hawlgan dhinaca maacuuntaas ah(NFIs), waxayna hay'adda ICRC ugu baaqaysaa hay'adaha kale ee dhinaca bini'aadminnimada ee ka hawlgala Mogadishu, inay iyaguna buuxiyaan baahiyaha dadka aan la gaadhin. Degmada Buale ee Gobolka Jubadda Dhexe, ayaa hay'adda ICRC, waxay ka bilowday qaybinta qalabka asaasiga ah ee qoyska iyo bacda howga la saaro oo ay ka faa'iidaysanayaan 1,100 IDP qoys. Ilaa 1,100 iyo 1,000 qoys oo kale oo ku dhaqan degmada Sakow, Jubada Dhexe iyo Degmada Diinsoor, Gobolka Bay, aya sidoo kale, waxay ka faa'iidaysteen qalab kuwaas la mid ah.

Hay'adda Save the Children ee Carriga Ingriiska(SCUK), ayaa weli waxay sii waddaa hawlgalka biyo dhaamiska ee in ka badan 2 malyan oo litir/sodonkii maalmoodba oo loo qaybiyey ilaa 87,318 dadka bara-kacay(IDPs) iyo dadka degaanka Belet Weyne oo dhan ilaa (14,553 qoys). Wuxuuna Qof kasta helayaa ugu yaraan shan litir, maalintiiba. Marshuucan oo hawlgalkiisu socon doono mudo 30 maalmood ah, waxaa gacan ka gaystay santuuqa gurmadka Bini'aadminnimada. Intaas waxaa dheer, iyadoo hay'adda SCUK, ay saabuun u qaybisay ilaa 9,323 qoys, iyadoo sidoo kalena ay isticmaaleen ilaa 299,880 oo ah qasabadaha biyaha nadiifka ah oo si gaar ah loo ilaaliyey faya-dhawrkooda, si looga hortago cudurrada biyaha ka dhasha. Ilaa 56,000 qoys oo kale, ayaa iyaguna ka faa'iidaystay hawlgalka ku wejahan.biyaha Kiimikada.lagu daaweeyey. Waxay kaloo hay'adda SCUK, ka dhisaysaa ugu yaraan 333 musqulood oo ay ka faa'iidaysan doonaan ilaa 18,176 dadka ku bara-kacay gudaha iyo nawaaxiga Belet Weyne.

Toddobaadkan, waxay hay'adda Concern World Wide, lacag dhan US$ 100 u qaaybisay ilaa 151 qoys oo ku dhaqan Degmada Marka, kuwaasoo ay saameeyeen roobabkii mahiigaanka ahaa ee toddobaadkii tegey ka da'ay qaybo ka mid ah Gobollada Banadir iyo Shabeelaha hoose. Kooxda hawlgalka xakamaynta cudurka daacuunka, ayaa kulan yeeshay toddobaadka gudihiisa, iyagoo u hawlgeli doona olalolayaasha daaweynta ceelasha biyaha iyo wacyi-gelinta dadweynaha, si looga hortago in cudurku goobaahaas ka dillaaco.

Wixii Faahfaahin Dheeraad ah ee xogta Afka Ingriiska kala xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – *maingi@un.org*,
Xogta Afka Soomaaligana kala Xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Shabakadda:http://ochaonline.un.org/somalia